

Taageerida ardayda oo Joogta Guriga: Fasalka 4

Waxaa markii hore sameeyay Dugsiyada Dadwaynaha ee Degmada Howard (Howard County Public Schools); waxaa loo diyaarshay Dugsiyada Dadwaynaha ee Denver (Denver Public Schools)

Dulmarka

Tusmadaan waxaa loo sameeyay inay bixiso fikrado lagula fal galaayo carruurta ku jiray hawlaha waxbarashada inta dugsiyadu xiran yihiin cudurka COVID-19 awgiis. Hawlaha liiska ku jira waxaa loogu talagalay inay gacan ka gaystaan ilaalinta firfircoonaanta garaadka carruurta intay guriga joogaan. Fikradaha shaqadu badal uma noqonayaan casharka heerka koobaad ah ee dugsiyada lagu baxsho. Talaabooyinka ugu fiican ee casharada koobaad waxaa la samaynayaa marka ardaydu kusoo laabtaan dugsiga.

Hawlaha iyo shaqooyinka carruurta guriga ku samaynayaan waxaa loo adeegsan doonaa qiimayn ahaan ama waxaa lagu darayaa qayb kamid ah fasalka ardayda. Qoysasku waa inay akhriyaan liiska dookhyada la xushay ee ku haboon ilmahooda ayna heli karaan. Nashaadaadka waxaa la samayn karaa wax ka badan hal mar.

Dagso Jadwalka Hawlaha Maalin kasta

8:00 AM-9:00	Kac oo Diyaar Noqo	Cun quraac, labiso, una diyaar garoow maalinta
9:00 AM-10:00	Waqtiga Waxbarashada	Ka dooro hal ama ka badan dookhyada ku jira liiska hoose.
10:00 AM-10:30	Free Choice	Dooro shaqo sida legos, wax sawirada, cunto karinta, googaalaysiga, ciyaaraha boorka
10:30 AM-11:00	Waqtiga Shaashada	Ka dooro hal ama ka badan oo nashaadaadka shaashada ah oo ku jira liiska hoose.
11:00 AM-12:00	Qadada iyo Waqtiga Fasaxa	Cun qado, soo wareeg ama banaanka kusoo ciyaar
12:00 PM-1:00	Waqtiga Waxbarashada	Ka dooro hal ama ka badan dookhyada ku jira liiska hoose.

1:00 AM-1:30	Free Choice	Dooro shaqo sida legos, wax sawirada, cunto karinta, googaalaysiga, ciyaaraha boorka
1:30 AM-2:00	Aqrinta	Akhri buug ama ka dooro buug aalada oonleenka ah oo ku jira mid kamid ah ilaha hoos ku qoran.
2:00 AM-2:30	Waqtiga Banaan aadista	Soo wareeg ama banaanka kusoo ciyaar
2:30 AM-3:00	Waqtiga Shaashada	Ka dooro hal ama ka badan oo nashaadaadka shaashada ah oo ku jira liiska hoose.
3:00 AM-4:00	Free Choice	Dooro shaqo sida legos, wax sawirada, cunto karinta, googaalaysiga, ciyaaraha boorka

Dookhyada Shaqada

Qayb kasta oo casharka kamid ah waxay leedahay dookhyada "Boorka Dookha". Ka fikir inaad hawlo kaladuwan ka doorato mawduucyo dhaw ah oo kaladuwan maalin kasta. Dookhyadaan waxaa ku jira fursadaha jimicsiga jirka, akhrinta buugta, iyo adeegsiga tignooloojiyada, ilaha oonleenka ah, iyo barnaamijyada taleefishinka. Wada sheekaysiga aad la samayso cunugaaga ee ku saabsan shaqooyinka ay samaynayaan ayaa gacan ka gaysan doona taageerida xirfadaha hadalka iyo fahanka.

Fadlan adeegso shaxda soo socota (oo ay markii hore lahaayeen Dugsiyada Dadwaynaha ee Degmada Howard (Howard County Public Schools) ayna dabaqeen adeegsigooda Dugsiyada Danwaynaha ee Denver (Denver Public Schools) si aad uga caawiso cunugaaga doorashada shaqooyin kaladuwan maalin kasta si aad u dhiiri galiso sii wadista casharka ee dhammaan mawduucyada:

Mawduuca	Dookha 1	Dookha 2	Dookha 3	Dookha 4
Farshaxan Luqadaha	<p>Waraaq udir jilaaga ugu wayn ee buuga aad akhrinayso. Talooyin kasii jilaaga sida loo xaliyo caqabadaha ku jira sheekada. Waaraqda aad dirayso, u sheeg inaad waligaa soo martay dhibaato tan la mid ah iyo sidaad u xalisay?</p>	<p>Akhri qoraal ama buug dhab ka hadlaaya. U qeex waxaad baratay saaxiib ama qof qoyskaaga kamid ah. Xasuusnoow inaad ku darto eray bixinta muhiimka ah ee ka timaada xogta aad qeexayso.</p>	<p>Adoo adeegsanaaya faahfaahinta ugu badan ee aad awoodo, qeex dalxiiska aad ku riyoonaayso. Ku dar xog gaar ah oo ku saabsan meesha aad aadi lahayd, meesha aad joogi lahayd, waxaad samayn lahayd, cidda kuu raaci lahayd dalxiiska?</p>	<p>Abuur xayiiisiin la xariirta filinka ama buuga aad jeceshahay. Xasuusnoow inaad ku darto mujalada, jilayaasha, goobta sheekada, budhiga sheekada, iyo qaybta.</p>
Xisaabta	<p>Samee diyaarad waraaq ah. Cabir mudada ay biibayso. Mar kale samee. Raadi farqiga u dhaxeeya labada tuurmo.</p>	<p>Qor jajabyada kala duwan. Sawir sawirka jajab kasta. Gali jajab kasta layn tiro ah. Sheeg jajabka ugu badan iyo kan ugu yar.</p>	<p>Qor su'aasha erayada ah ee su'aalaha kaladuwan ee iskudhufashada ah sida 24 x 7 ama 30 x 5.</p>	<p>Qor jajab, sida 7/8 ama 9/10. Ukala qaybi sadex meelood oo kaladuwan.</p>

<p>Saayniska</p>	<p>Hayso joornaalka sayniska guriga. Wax cusub ku dar maalin kasta adoo qoraaya ama sawiraaya. Maxaad la yaabtaa? Maxaad aragtaa (ujeedaa, maqlaysaa, dareemaysaa)?</p> <p>Akhri buugaagta sayniska ee dhabta ah kadibna qor waxa cusub ee aad baratay.</p>	<p>Guriga ma kuu joogaa xayawaan rabaayad ah ama xayawaan boonbale ah ood jeceshahay? Adoo adeegsanaaya xogta ugu badan ee aad heli karto, sawir oo calaamadee sawir ku saabsan qaybaha jirka ee xayawaanka iyo shaqada ay qayb kasta oo kamid ahi qabto.</p> <p>Ma ujeedaa wax xayawaano ah oo banaanka jooga? Qor waxa aad u jeedo ayagoo samaynaaya. Waa maxay habdhaqanka aad u jeedo?</p>	<p>Si dhaw ugu fiirso waxyaabaha kaladuwan ee aad ku aragto gurigiina ama banaanka (<i>asagoo qof wayn uu kuu fasaxaayo</i>). Fiiri dhagaxyada iyo ciida aaga xaafadiina. Meeqo nooc oo dhagaxyo kaladuwan ah ayaad arki kartaa? Meeqa eray ayaad u adeegsan kartaa si aad u qeexdo (midabka, tabaashada, xajmiga, qaabka)?</p>	<p>Naqshadee marinka orodka. Adoo adeegsanaaya sheey wareeg ah iyo qalaab wareeg ah sida xaashi aad duubtay iyo duubabka shukumaanada xaashida ah, samee marinka orodka. Sawir oo calaamadee naqshadaada adoo ku sawiraaya joornaalka sayniska gurigaaga. Cadaadi naftaada adoo ku daraaya sawirka isbadalo badan ood ku samayso jihada marinka. Ma samayn kartaa nooc sawir ah? May shaqaysay markii la tijaabiyay? Waa maxay noocyada hormarinta aad samayn karto?</p>
<p>Cilmiga Bulshada</p>	<p>Samee qariirada xaafadiina, gobalka, iyo/ama degmada. Ku dar qaybaha sifooyinka dhulka iyo kuwa dadku sameeyeen.</p>	<p>Abuur qorshe ganacsi ood u samaynayso ganacsi yar oo aad maamuli karto si aad lacag uga hesho. (tusaale, daba kaayada liinta lagu gado, meela gaariyaasha lagu dhaqo, soo wareejinta eeyga, iwm.) Aqoonso noocyada ilaha dadka, dabiiciga ah, iyo dakhliga ah ee aad u baahan lahayd.</p>	<p>Aqoonso hogaamiyaasha bulshada. Ka dood doorarkooda iyo waajibaadkooda. Waraaq u qor hogaanka bulshada adoo u sheegaaya fikrada aad ka qabto wax aad aaminsan tahay inay bulshada muhiim u yihiin.</p>	<p>Abuur qorshe kayd ood u samayso wax. Xaqiiji inaad aqoonsato qaabka aad ku helayso lacagta iyo sida aad u kaysanayso.</p>

Farshaxana da Ku quseeya	<i>Farshaxanka:</i> Naqshadee joogaaga ugu fiican ee kabaha ah.	<i>Farshaxanka:</i> Sawir qariirad aad qoraal ku calaamadaysay oo muujinaysa wax aad samaysay maalintii.	<i>Waxbarashada Jimicsiga iyo Caafimaadka:</i> Samee 30 daqiqo jimicsiga jirka ood dooranaysa adiggu.	<i>Jimicsiga iyo Caafimaadka:</i> Samayso xaflad qoob ka ciyaar ah. Ku dheel heesta aad jeceshahay.
Farshaxana da Ku quseeya	<i>Tignooloojiyada Casharada:</i> Ku tababaro adeegsiga kayboorka 20 daqiqo.	<i>Tignooloojiyada Casharada:</i> Samee Istuudyoowga Koodhka - Koorsada D, E ama F adoo galaaya code.org	<i>Muusiga:</i> Ku luuqee 2 qaab oo laxano fudud ah adoo adeegsanaaya luuqaynta caadiga ah.	<i>Xogta Maktabada:</i> Dooro noocyada kaladuwan ee alaabaha akhriska ayna ku jiraan buugaagta sawirka, buugta cutubyada leh, wargaysyada, iyo sheekooyinka shactirada ah. Baro aqoonsiga farqiyada u dhaxeeya mala awaalka iyo waxa runta ah.

Ilaha Dhijitaalka ah

Halkaan waxaad ka helaysaa dhawr ilood oo lasoo jeediyay oo oonleen ahaan lagu gali karo

- [Barnaamijka Wax ku baro guriga ee \(Scholastic Learn at Home\)](#)
- [PBSKids](#)
- [Maktabada Oonleena ah ee Denver Public Schools](#)
- [Adeegga Sheekada Taleefanka ee Maktabada Dadwaynaha ee Denver](#) (waxaad ku helaysaa afafka Ingiriiska, Isbaanishka, Amxaariga iyo Vietnamese)
- [Dookhyada Tignooloojiyada Cilmiga ee DPS:](#)
 - Dooro Qaybaha Dugsiga → Dugsigaaga → Gal (School Breakdowns → Your School → Go)!
 - Batoonka [“Ogolaanshaha Waalidka ayaa Qasab ah \(Parent Consent Required\)”](#): Ilaha lagu ogolaaday ogolaanshaha waalidka ee dugsigaaga
 - Batoonka [“Ogolaanshaha Waalidka Qasab Maaha \(Parent Consent Not Required\)”](#): Ilaha ay ogolaatay degmadu

[Fikradaha nashaadaadka waalidka oo ku qoran afka Isbaanishka](#)

- [Las Provincias](#)
- [Bebesymas](#)
- [Sapos Y Princesas](#)

[TV ga Waxbarashada](#)

PBS waxay leedahay noocyo kaladuwan oo TV yada waxbarashada ah. Halkaan ayaad ka helaysaa qabaka aad ku gali karto BPS ka aaga Denver.

- [Dhanka Khadka Hawada \(Antenna\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6.1**
 - RMPBS KIDS: Channel **6.2**
- [Cable TV \(Comcast\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6 iyo 658**
 - RMPBS KIDS: Channel **245**
 - Create/World*: Channel **248**
 - Markaad Dalbato: Channel **1** ("Colorado-haaga")
- [Satalaytka \(TV GA TOOSKA AH\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6**
- [Satalaytka \(Khadka Diishka\)](#)
 - Rocky Mountain PBS HD: Channel **6**